

**Sweetened Beverage Tax (SBT, Canshuurta Cabitaanada Macaan) ee Magaalada Seattle
Prenatal-to-Three Community Grant Program (Barnaamijka Deeqda Bulshada Dhalmada kahor-illaa-
da'da Saddex sano)**

Xogta Kooban ee Wehelka ee Research Fairness Initiative (RFI, Hindisaha Habboon ee Caddaalada ah)

HORDHAC

The Department of Education and Early Learning (DEEL, Waaxda Tacliinta iyo Waxbarashada Hore) waxay arjiyo ka codsanaysaa ururada bulshada ku salaysan (CBOs) ee danaynaaya bixinta adeegyada si loo hagaajiyo natiijooyinka caafimaadka iyo waxbarashada ee loogu talagalay shakhsiyaadka muddada dhalmada kahor-illaa-da'da Saddex sano.

Qiyaas ahaan \$1.4 milyan ayaa diyaar u ah maalgashigan sannadyada 2023-2025. Hay'adaha u qalma waxay soo gudbin karaan hal arji oo ay ku codsanayaan ugu badnaan \$140,000 sannadkiiba wadar ahaan \$280,000 muddo laba sanno ah. Maalgelinta waxaa lagu bixin doonaa hannaanka Request for Proposal (RFP, Codsashada Arjiga) ee ay maamusho Department of Education and Early Learning (DEEL) ee Magaalada Seattle. PN-3 Community Grant RFP (RFP, Dee qda Bulshada ee PN-3) waxay raadinaysaa arjiyada oo diirada lagu saarayo afar meelood:

1. Dhalmo Caafimaad qabta oo Loo Siman yahay
2. Caafimaadka Waalidka iyo Ladnaanta Dareenka
3. Kobcinta iyo Daryeel-siinta Dareencilinta
4. Caafimaadka iyo Korniiinka ugu Fiican Ilmaha

DEEL waxay mudnaanta siinaysaa maalgelinta ururada bulshada ku salaysan (CBOs) oo leh ujeedooyin ay ugu adeegaan waalidiinta ilmo dhalista kujira, daryeelayaasha iyo/ama mas'uuliyiinta carruurta da'doodu tahay mujugyada ilaa saddex jir ee ku nool gudaha Magaalada Seattle iyada oo dan gaar ah u leh gaaritaanka bulshada mudnaanta leh, oo lagu qeexay bulshooyinka dadka laga tiro badan yahay, soo-galootiga, qaxootiyada, dadka dakhligoodu hooseeyo, iyo bartayaasha luqadda Ingiriiska. Arjiyada ku guuleysto waxay heli doonaan laba sano oo maalgelin ah.

UQALMIDA IYO MAAL GELINTA

Si aad ugu qalanto maalgelinta iyadoo loo marayo RFP, arji-qortayaasha waa inay noqdaan mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Aan ahayn urur faa'iido doon ah (ama dhaqaale ahaan uu kafaalo qaado urur) oo leh 501(c) 3 xaalada (oo ay ku jiraan ururada bulshada ku salaysan ama caqiidada ku salaysan)
- Ururka bulshada ama wada shaqaynta aan loogu darin faa'iido-doon ahaan, sida iskaashatada bulshada, isbahaysiyada iyo/ama kooxaha kale ee ehelnimada, waa in ay aqoonsadaan kafaala-qaade maaliyadeed oo buuxiya shuruudaha loo baahan yahay ee qandaraas la gelida Waaxda
- Dadka Mareykanka Dhaladka ah

Intaa waxaa dheer, arjiyadu waa inay siiyaan adeegyo ka qaybgalayaasha deggan gudaha xadadka Magaalada Seattle.

Mashruucyada kuwaas oo aanan uqalmin fursada maal gelintaan waxaa kamid ah soojeedinada kuwa:

- Bixiya taageerada tayada ama kabitaanka dhaqaale ee daryeelka caruurta ruqsada uhaysta

- Kaliya diiradda saara taageerida hawlaha guud ee ururka
- Aan lahayn diiradda dhexe ee dhalnada kahor-illaa-da'da-saddexaad
- Diiradda saara u ololeynta siyaasada

JADWALKA HAWLAHA

Dhacdada	Taariikhda/Waqtiga
Request for Proposal (RFP) wuxu furmaya	05/03/2023
Kulanka macluumaadka RFP (horay loo duubay)	05/03/2023, ugu danbayn 6:00 Galabnimo
Muddada Caawinta Farsamada Mid-mid-Kali ah	05/03/2023 ilaa 06/07/2023, ballan ahaan
Xiliga su'aalaha iyo jawaabaha	05/03/2023 ilaa 06/07/2023, ugu danbayn 3:00 Galabnimo
Taariikhda kama dambaysta arjiyada	06/14/2023, ugu danbayn 3:00 Galabnimo

CAAWINTA FARSAMADA SOOJEEDINTA QORSHAHA BULSHADA KUSALEYSAN

Bilaash, technical assistance (TA, caawinta farsamada) tooska ah ayaa la heli karaa si loogu caawiyo bixiyaasha hormarinayo soojeedinta qorshahooda oo ka socdo la-taliyaal khubara ah oo bulshada ku saleysan. Waxaan si xooganu dhiiri gelineynaa ka faa'iideysiga caawinta farsamo si loogu taageero horumarinta qorshahaada soojeedin, waafaqsan mudnaansiinta RFI-gan iyo taageerada dib u eegista haggidda farsamo ee RFP. Si aad oga faa'iideysato taageerada caawinta farsamo, fadlan xor unoqo inaad la xiriirto mid kamid ah la-taliyaasha hoos kutaxan.

Bixiyaha TA	Aasaaska iyo Xiriirka
Catherine Verrenti	<p>Catherine Verrenti waxay ku faraxsan tahay inay hesho fursad ay kutaageerto community-based organisations (CBOs, ururada ku saleysan bulshada) kuwaas oo si qoto dheer udhex galay bulshada. Waxay bixisaa xirfadaha iyo aragtida ay ka heshay khibradeeda tooska ah ee labaatanka sano ah, oo ay kujirto Neighborhood House iyo YouthCare. Khibradaan waxaa kamid ah horumarinta deeqda oo ay kujirto horumarinta maareynta ballaaran oo dhaqan ahaan wax utaraya dhallinyarada, taageerada qoyska, waqtiga iskuulka ka baxsan, maareynta kiiska iyo barnaamijyada dadka hoy' la'aanta ah.</p> <p>Kala xiriir: catherine@verrenticonsulting.com</p>
Hassan Wardere	<p>Hassan Wardere wuxuu ku takhasusay maareynta mashruuca, kaqeybgalka bulshada saxda ah, karti dhisida, isbadel maareynta, qorsheynta istiraatiijiyada iyo iskaashiga, kaalmada farsamo, iwm. Hassan wuxuu ka faa'iideystaa istiraatiijiyad gaar ah ee la xariirta qiimeynta dhaqamada guriga marka lagu taageerayo fikradaha istiraatiijiyada, naqshadaha guuleysta iyo isdhexgalka hal abuurka, habeynta, barnaamijka sinnaanta iyo adeegyada. Wuxuu sidoo kale leeyahay khibrad ballaaran oo ku aadan la shaqeynta CBOs oo u adeegga qoysaska soogalootiga iyo qaxootiga.</p> <p>Kala xiriir: projects@bulleconsulting.com</p>

CAAWIYAYAASHA LUUQADA:

Haddii aad ubaahan tahay caawin luuqadeed oo dheeraad ah, DEEL waxay kusiineysaa caawin. Fadlan kala xiriir Tiffany Lee tiffany.lee@seattle.gov.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaadka oo dhameystiran ee Grant Program (Barnaamijka Deeqda) ayaa lagu faafaahiyey

Prenatal to Three Community Grant Program Request for Proposal (Codsiga Ujeedooyinka Barnaamijka Deeqda ee Kordhiya U diyaarsanaanta Dugsiga Xanaanada).Dhammaan xogta iyo dukumiintiyada codsiga barnaamijkaan deeqda waxaa laga heli karaa: webseedka fursadaha maalgalinta ee DEEL: <http://www.seattle.gov/education/for-providers/funding-opportunities>